



Date: 17-October 2017

War-saxaafadeed

Xubno ka mid ah guddiga fulinta Dalladda Bulshada rayidka ee Puntland (PUNSAA) oo shir aan caadi ahayn ku yeeshay Xarunta dallada ee Garowe, maanta oo taariikhdu tahay 16-October, 2017 waxay cambaarayeen qaraxii waxashnimada ahaa ee lala beegsaday shacabka Soomaaliyeed ee ku sugnaa isgoyska Zoobe ee magaalada Mogadishu kaas oo sababay dhimasho iyo dhaawac badan.

Guddiga fulinta iyo dhamaan xubnaha golaha guud ee Dalladda Bulshada rayidka ah (PUNSAA) waxay tacsii u dirayaan dhamaan umudda Soomaaliyeed gaar ahaan eheladdi iyo qaraabadii dadkoodu ku nafwaayey qaraxaasi ka dhacay caasimada dalka waxay ahayd geeri guri walba gashay kana ilmaysiisay cid walba oo maqashay ama aragtay. Waxaan alle ugu baryeynaa in uu caafimaad degdeg ah siiyo dadkii ku dhaawacmay qarraxaas inti dhimatayna janadii fardowsa geliyo.

Dalladu waxay ugu baaqaysaa guud ahaan umadda Soomaaliyeed meel kastoo ee ka joogaan dal iyo dibadba garahaan, dadka reer Puntland in ay u gurmadaan walaalhooda ku waxyeeloobay qaraxa muujiyaana door caawimaad mug leh iyo garab istaaga dadka ay dhibaatu soo gaartay.

Bulshada Rayidka ah ee Puntland (PUNSAA) waxay ugu baaqaysaa dowladda Puntland in ay hormuud u noqoto abaabulka ay sameenayaan dadka reer Puntland gurmada lagu gaarsiinayo dadka qaraxu waxyeelay sidoo kalana in shacabka Puntland ee kaalintooda ka qaataan sidii loo garabsiin lahaa qoysaska liita oo ay saameysay musiibadu.

PUNSAA waxa kale oo u soo jeedinayaan Dawladda federaalka, Dawladaha xubnaha ka ah iyo beesha caalamka inay xil weyn iska saaraan siday ugu qeyb galaan gurmada loo fidinayo dadka ay dhibaatooyinku soo gaareen.

Mahadsanidiin

Faysal Ahmed Warsame

Gudoomiyaha Dallada PUNSAA

